

13-ka Nofeembar, 2018

Deriskayaga Qaaliga ah:

Xilligii deyrta ee Minneapolis wuxuu isu beddelaya xilligii qaboobaha, oo waa wakhtigii la isu diyaarin lahaa barafka. Minneapolis sannad kasta tira ahaan barafku wuxuu ka dhacaa 25 jeer, oo siduu u yimaado waa sidii roob barfoobay ama dabeylo baraf wata. Waa in aan ka wada shaqeyno inaan Minneapolis ka dhigno magaalo ay dadku ku dhex socdaan mar kasta, oo warqaddan waxaan kuugu soo qoray waa wada-shaqeynta arrintaas. Dad badan oo naga mid ah ayaa u lugeeya iskuullada, dukaammada iyo meelo badan oo ay dan ka gasho. Haddii aadan jidadka nagu caawin magaalada lama isticmaali karo, gaar ahaan dadka ay ku adag tahay in ay socdaan. **Fadlan xaaq jidka lagu lugeeyo ee gurigaaga.**

Sharci-hoosaadka Magaalada Minneapolis ee 445.20 waxa uu dhigayaa in guryaha halka qoys ama labada qoys ay haystaan 24 saac ka dib marka uu barafku joogsado in ay barafka ka xaaqaan jidadka lagu lugeeyo ee ku dhow gurigooda. Guryaha kale oo dhan waa in barafka looga xaaqo 4-saac gudahood. Magaaladu waxay sii wadeysaa in sharcigan si adag loogu dhaqmo. Waxaa jira cabashooyin aan ka helno khadka dadweynaha ee 311, laakiin waxa kale oo jira kormeereyaal aan u dirno xaafad kasta si ay u soo eegaan jidadka lagu lugeeyo ee aan barafka laga xaaqin. Gurigii lagu arko in ay xaaqi waayeen barafka jidadka lagu lugeeyo, waxaa loo soo diri doonaa waraaq digniin ah (oo la yiraahdo Notice of Violation), dabadeedna waxaa loo cuskanayaa sharciga Magaalada ee (Chapter 445.35) oo dhigaya in ay barafka magaaladu xaaqdo. Qiyaastii lacagta badanaa la iska qaado markaas waa \$150. Waxaan rabnaa in aan lagu ganaaxin ee hadda farriintan ka dhigo xusuusin.

Waxaan ognahay inay jiraan dad aan barafka iska xaaqi karin lixaadkooda awgiis, dadkaas waxaan u haynaa siyaabo kale oo loo caawin doono. Dhowr hay'adood oo ka mid ah kuwa aan macaashka ku shaqeyn ayaa diyaar u ah in ay dadkaas caawiyaan iyaga oo ka bixinaya lacagta xaaqidda barafka marka uu baraf yimaado. Haddii aad hay'adahaas caawimaad uga baahaan tahay soo garaac 311 si aad u ogaato siyaabaha loo caawiyo deegaankaaga.

Waaxda Hawlaha magaalada waxaa farxad u ah xaqiijinta in ay magaaladu kala socoto xaalad kasta oo lagu jiro. Marka uu baraf yimaado shaqaalaha Minneapolis ayaa si aad u adag uga shaqeyna in ay xaaqaan barafka yaalla dariiqyada, luuqluuqyada, jidadka lagu lugeeyo iyo qiyaas ahaan 300 oo buundo. Marka uu soo da'o baraf ka badan afar inji, shaqaalaha magaalada ayaa qiyaastii xaaqa 16,000 oo meelood gees kasta. Haddaba aan si wadajir ah u wada shaqeyno, Minneapolis waxaan ka dhigeynaa magaalo kala socota.

Waad ku mahadsan tahay sidaad uga qeyb qaadaneyso xaaqidda barafka.

Mahadsanid,
Robin Hutcheson
Agaasimaha Hawlaha Magaalada



For reasonable accommodations or alternative formats please call 311 or 612-673-3000.
People who are deaf or hard of hearing can use a relay service to call 311 at 612-673-3000.
TTY users can call 612-673-2157 or 612-673-2626. Para asistencia 612-673-2700 - Rau kev pab 612-673-2800 -
Haddii aad u baahan tahay caawimaad gaar ah fadlan nagala soo xiriir 612-673-3500.

